

# TALLAALKA COVID-19 EE JOHNSON & JOHNSON (JANSSEN)

062121 SOMALI

Tallaalka Covid-19 Ee Johnson & Johnson/Janssen (J&J) waa mid ka mid ah saddexda tallaalka ee u diyaarka ah dadka waweyn ee Maraykanka. Waa arrin caadi ah in la qaato in ka badan hal tallaalka si looga hortago fayras kali ah.

Dhammaan tallaalkada kuu diyaarka ahi waa kuwo si aad u wacan kaaga ilaalinaya xanuun daran, isbitaal dhigista iyo dhimashada loo dhimanayo COVID-19. Dhammaan waxa ku talo bixiyay khubarada caafimaadka.

Jidhkaagu waxa uu u diyaar noqon doonaa inuu ku ilaaliyo 2 todobaad ka dib marka aad halka tallaalka ee tallaalka J&J aad qaadato.



## Waxa uu qabto

Tallaalka J&J waxa uu isticmaalaa fayras kale (viral vector) si uu tilmaamaha tallaalka ugu gudbiyo jidhka. Waxaa ku jira adenovirus (fayras sababa duriga caadiga ah), kaasoo sida hiddo-sidaha barotiinka spike ee koroona-fayraska. Tani waxa ay jidhkaaga baraysaa sida uu u aqoonsanaayo ulana dagaallamayo koroona-fayraska sababa COVID-19, sida tallaalkada kale ee la oggolaaday (Pfizer iyo Moderna).

## Waxa aanu qabanaynin

- Kuma qaadsiiinayo COVID-19 ama duriba.
- Ma baddalayaan DNA daada ama walxahaaga hiddo-raac.
- Ma sababo madhalaysnimo.

## Maxaa ku jira tallaalka COVID-19 ee Johnson & Johnson?

Tallaalka J&J waxaa ku jira adenovirus wax laga baddalay oo dusha ku sita xog uu leeyahay koroona-fayrasku. Waxaa kale oo ku jira waxyaabo kale kanoo ka caawinaya tallaalku inaanu waxyeeloobin: milix, sonkor iyo iskudhisyo orgaanik ah oo kale.

Tallaalka kuma jiro beed, waxyaalaha ka ilaalinaya qudhunka, latex, doofaar ama wax kale oo xayawaanka ku jira, unugyada uurjiifta ama koroona-fayras.

## Tallaalka J&J waxaa loogu talo galay dadka waaweyn ee da'doodu tahay 18 jir iyo ka wayn

La hadal dhakhtarkaaga ama xaruntaada caafimaad haddii aad uur leedahay ama naas nuujinayso, aad leedahay xasaasiyad aad u khatar ah, aad leedahay cillad xinjiraw dhiigga ah ama qaadanayso daawooyinka xinjirawga dhiigga yareeya.

## Saamaynaha xunxun ee daawada

Dad badani waxa ay yeeshaan saamayno xunxun oo khafiif ah kadib marka ay qaataan tallaalka. Tani waa calaamad sheegaysa in jidhkaagu uu qabanayo waxa ay ahayd inuu qabto: tanoo ah samaynta difaac lagaga hortagayo cudurka. Xataa haddii aanad yeelan saamayno xunxun, tallaalku waxa uu ka shaqaynayaa si uu kuu ilaaliyo.

- Saamaynaha aan wanaagsanayn ee ugu badan waxa ka mid ah xanuun ama barar halka aad ka qaadatay tallaalka, madax xanuun, daal, iyo/ama xummad yar.
- Calaamadahani caadi ahaan waxa ay baaba'aan maalmo yar gudahood. Haddii aanay kaa baabi'in, wac dhakhtarkaaga ama xaruntaada caafimaad.



## Dhibaatooyin dhif iyo naadir ah, habase ahaatee khatar ah

### Falcelin xasaasiyadeed

Waa dhif, laakiin dadka qaar waxa ay ku yeeshaan falcelin xasaasiyadeed oo aad u daran tallaalka COVID-19. Qofkasta waxa la weydiistaa inuu sugo wakhti yar kadib marka uu tallaalka qaato si loo xaqiijiyo inaanay dhicin falcelin xasaasiyadeed oo daran. Wakhtiga sugitaanku waxa uu wakhti siiyaa inaad hesho daryeel caafimaad haddii laga maarsan waayo.

### Cilladda xinjirawga dhiigga

Sarkaalada caafimaad ee heer gobol iyo federaal waxa ay ku talo bixiyeen in lasii wado isticmaalka tallaalka Johnson & Johnson (J&J) ka dib markii 10 cisho la hakiyay Abriil, 2021. Hakinta sababteedu waxa ay ahayd in khubarada caafimaad la siiyo fursad ay si wacan ugu fahmaan khatarta cilladda xinjirawga dhiigga ee dhifta ah ee lagaga soo warbixiyay dhowr qof oo qaatay tallaalka.

Xaaladan darani waa cillad xinjiraw dhiigga ah oo saamaynaysa xididdada dhiigga ee maskaxda, caloosha, ama lugaha oo ay raacdo platelets ka oo yaraada (nooc unugyada dhiigga ah oo ka caawiya jidhka inuu joojiyo dhiigbaxa). Waxaa loo yaqaanaa xinjiraaw iyadoo cillad xinjiraw yari ahi jirto (thrombosis with thrombocytopenia syndrome), ama TTS. Cilladani waa mid aad khatar u ah waxaana ay keeni kartaa dhimasho, laakiin waa mid sidoo kale la daaweyn karo. Daaweyntu waa ay ka duwan tahay marka la eego cilladaha xinjiraw ee dhiigga ee kale.

TTS waa mid aad dhif iyo naadir u ah. Khubaradu waxa ay ku qiyaasaan in 7 dumar ah 1kii milyanba ee dumar ah ee qaata tallaalka ee da'doodu u dhaxayso 18 iyo 49 sanno jir ay tani yeelan karaan. Dumarka da'doodu tahay 50 jir iyo wixii ka weyn iyo ragga dhamman da'day doonaan ha ahaadaane, dhibkan caafimaad waa mid kaba sii naadirsan, inkastoo ay dhacday.

Khubarada caafimaad ee diraaseeyay bukaanada TTS ee qaatay tallaalka Johnson & Johnson waxay go'aamiyeen in dadka badankooda faa'idada qaadashada tallaalka Johnson & Johnson ay ka badan tahay khatarhiisa. Khatarta aad ku yeelanayso cillad xinjiraw ama aad ugu dhimanayso cudurka COVID-19 ayaa ka weyn khatarta aad ku yeelanayso cillad xinjiraw oo aad ugu dhimanaysid tallaalka.

### Iska eeg calaamadahan aadka u khatarta badan saddex todobaad ka dib marka aad qaadato tallaalka:

- madax xanuun aad u daran ama madax xanuun aan baaba'ayn
- aragga oo daciifa
- shaf ama calool xanuun aad u daran
- xanuun ama barar lugaha ah
- neefsiga oo dhib noqda
- si fudud nabaro u samaysma ama meelo yaryar oo dhiig ah oo maqaarka hoostiisa ah oo ka baxsan halkii aad irbadda tallaalka ka qaadatay

Haddii aad yeelato mid ka mid ah calaamadahan, wac 911 ama tag qolka gargaarka gurmada degdegga ah. Waxaa mihiim ah inaad u sheegto inaad qaadatay tallaalka Johnson & Johnson si ay markaasi daryeelka saxda ah kuu siin karaan.

### Ku ilaalinta naftaada amni

COVID-19 ku weli waa uu ku faafayaa bulshadeena mana jiro tallaalka 100% waxtar leh. Xataa ka dib marka aad tallaalka qaadato, sii wad inaad gacmahaaga dhaqdo, ku xidhato maskaro meelaha dadweynuhu isugu yimaadaan, ka fogaato dadka soona koobto wakhtiga isu imaatinada yaraysana dadka isu imanaya ama isu imaatinada dadka kale ee tallaalka qaatay.

**Ka raadi websaytka degmada "COVID-19" sii aad u hesho xog maxalli ah.**

